



# Barnaamujka dhaqaalaha

SOMALISKA

**Barnaamujka dhaqaalaha waa barnaamuj waxbarashada sare diyaarin u ah oo lagu qaadanaayo shahaado waxbarashada sare diyaarin u ah.**

Barnaamujka dhaqaalaha wuxuu ku habboonyahay qofkii rabo in uu barto cilmiga barashada mujtamaca, ugu horreyn qofka rabo in uu barto dhaqaalaha iyo cilmiga sharciyada. Barnaamujku wuxuu ku habboonyahay qofkii rabo in uu barto habka loo bilaabo, loo wado iyo loo horumariyo shirkad.

Waxbarashadu waxay aasaas u tahay waxbarasho dambe oo jaamacadda lagu barto dhaqaalaha, cilmiga sharciyada iyo qeybabka kale oo ka mid ah cilmiga barashada mujtamaca.

## LABO JIHO OO KALA DUWAN

### Dhaqaalaha

- Waxaad wax ka barandoontaa qeybabka cilmiga dhaqaalaha ee shirkadaha, xisaab xidh, xisaab, hoggaamin iyo urur. Waxaad baraneysaa habka loo bilaabo oo loo wado shirkad.

### Cilmiga sharciyada

- Waxaad baraneysaa muhiimadda ay nidaamka xuquuqdu ku leeyahay bulshada iyo sida uu raadka ugu yeesho xuquuqda caalamiga. Waxaad horumarineysaa awoodaada sameynta baadhitaan iyo qiimeynta dhibaatooyinka cilmiga sharciyada.

## Waxaan baad barnaamujka ku barandoontaa

Waxaad horumarindoontaa cilmiga aad ka leedahay dhaqaalaha bulshada, dhaqaalaha shirkadaha, habka shirkadeynta, cilmiga sharciyada, taariikh iyo cilmiga nafsiga. Waxaad baraneysaa xaaladaha dhaqaalaha ee bulshada, ganacsiga u dhaxeeyo wadamaha, iyo shirkadaha kaalinta iyo mas'uuliyadda ay ka leeyihiin adduunka. Waxaad baraneysaa siyaabaha loo xalliyo dhibaatooyinka shirkadaha. Waxaad fahan ka helaysaa habka aadamigu u fikiro, u dareemo, u dhaqmo iyo wada shaqeeyo aadamaha kale. Waxaad wax ka baraneysaa qiimaha uu nidaamka xuquuqdu ku leeyahay bulsho dimuquraadi ah iyo sidoo kale waxaad fahmi doontaa saameynta uu xuquuqda aadamigu ku leeyahay qaanuun dejinteen. Waxaad horumarineysaa awoodaada aad baadhitaan ku sameysid iyo qiimeynta dhibaatooyinka cilmiga sharciyada.

## Habkaan buu barnaamujku u diyaarsanyahay

Barnaamujka cilmiga barashada mujtamaca maadooyinka wadajirka u ah dugsiga sare waa: ingiriis, taariikh, ciyaaraha- iyo caafimaadka, xisaabta, cilmiga sayniska, diinta, cilmiga barashada mujtamaca, iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqad

labad ah. Barnaamujaasha oo diyaarinta u ah waxbarashada sare waxaad ku akhrisan doontaa koorsooyin badan oo cilmi dhegood ah oo aanan lagu akhrisan barnaamujaasha xirfadeed.

Maadooyinka sifooyinka wadajirka loo leeyahay ee barnaamijka waa: dhaqaalaha shirkadaha, cilmiga sharciyada, luuqadaha casriga ah iyo cilmiga nafsiga.

Waxaad fursad u helaysaa in aad ku takhasustid oo aad cilmi dheeraad ah u yeelatid barnaamijka. Waxaa taas la dhahaa si qoto dheer ah barnaamijka loo galo. Kuwaasi waxay ahaan karaan maadooyin oo tusaale ahaan ah: cilmiga fayloosofiga, juquraafiga, isgaadhsiinta qoraalka ah, hoggaanimada iyo ururka, xisaabta, qalabka isgaadhsiinta, luuqadaha casriga ah, cilmiga nafsiga iyo cilmiga bulshada. Iskoolka ka wareysa maadooyinka si qoto dheer ah loo sii galayo oo ay soo bandhigayaan.

Sidoo kale waxaad leedahay doorasho gaar ahaaneed oo aad dooran kartid waxa aad akhrisaneysid. Iskoolka weydii koorsooyinka ay heystaan.

### **Habka shaqada**

Barnaamujka waxaad baareysaa, baaritaan sax ah ku sameyn doontaa oo qiimeyn doontaa warbixin adiga oo hab dhalaacey ah u eegayo. Waxaad ka ambaqaadeysaa dhaqaalaha bulshadeed, dhaqaalaha shirkadeed iyo dhibaatooyinka cilmiga sharciyada oo aad dad kale la xallin doontid ama keligaa. Waxaad horumarineysaa awoodaada aad ku doodeysid dhinacyo kala duwan iyo aad natiijo ku gaareysid iyo aad ku munaaqashooneysid dhinaca fahan dhexaad, aragti iyo naqshado.

Waxaad baraneysaa in aad dhistid oo aad soo bandhigtid koox dad oo khaas ah oo lagu diray, natiijooyinkaada adiga oo adeegsanayo nooc cilmiyeysan.

### **Shaqada dugsiga sare**

Dhamaadka barnaamujka dhaqaalaha waxaad sameyn doontaa shaqada dugsiga sare. Halkaas waxaad ku qeexaysaa su'aal, waad qorsheyneysaa, waad gudagaleysaa, sidoo kalena waad qiimeyneysaa shaqo weyn oo ka ambaqaadmeyso maadooyin aqoon oo muhiim ah oo ka mid ah barnaamujka.

### **Arrin in lagu fikiro u baahan**

Haddii aad rabtid u qalimid khaas ah oo mid ka mid ah waxbarashada jaamacadda waa in aad qorsheysatid daraasooyinkaada. Waa ay ficantahay in lala hadlo macallinka xirfadaha- iyo waxbarashada, haddii aad rabtid in aad jaamacad aadid.

Markasta waxaad xaq u leedahay, doorashada gaarka ah dhexdeeda, in aad dooratid koorso sii dheer oo ciyaaraha- iyo caafimaadka ah iyo koorso bilic ah.